

# ASTAAMO BINI'AADAMNIMO

SI KOOBAN

ICRC

# ASTAAMO BINI'AADAMNIMO

Astaamaha Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas waa astaamo caalami ah oo rajo u ah dadka ay dhibaatooyinka bini'aadamnimo ku habsadaan. Astaamuhu waxay rajo ku abuuraan dadka la hardamaya colaadaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee rabshadaha ama dhibaatooyinka kale ee ka dhasha musiibooyinka dabiiciga ah.

Hadii lagu muujiyo calaamadda dhaqtar ka shaqeeya isbitaal, ama gaari daabulaya dad dagaal ku dhaawacmay, ama diyaarad sida alaab gargaar, calaamadahani waxay astaan u yihiin howl bini'aadamnimo oo eex la'aan ah, dhexdhexaad ah, oo madaxbnaan oo loo qabto dadka Adduunka oo dhan.

Hadana, astaamuhu intaas oo keliya kuma saabsana. Xilliyada colaadda hubaysan, Laanqayrta Cas, Bisha Cas iyo Cristal-ka cas, waxaa caalami ahaan loo aqoonsan yahay in ay yihiin calaamado ilaaliya shaqaalaha caafimaadka ee ciidammada qalabka sida alaabta, rugaha, iyo adeegyada caafimaadka ee rayadka. waxaana ka mid ah adeegyada caafimaadka ee Jamciyad Qarameedyada Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas (Jamciyad Qarameedyada) marka ay ka caawinayaan adeegyada caafimaadka

ee ciidamada qalabka sida ama markay si rasmi ah fasax uga haystaan madaxda, si waafaqsan Axdiyadii Jineefa.

Astaamuhu waa ka madax banaan yihiin diin, siyaasad, iyo dhaqan. Laba qaab ayaa suuragal ah in loo adeegsado:

- Calaamad ilaalineed, taas oo dhinacyada colaaddu ka dhexayso u sheegaysa dadka, baabuurta ama qalabka ay astaamahaasi ka muuqdaan inay waajib tahay in goor kastaba la ilaaliyo oo weligood aan la bar-tilmaameedsan ama la weerarin. Taasna waxaa loo yaqaan adeegsiga ilaalineed ee astaamaha, iyo.

- In lagu muujiyo qof, baabuur ama dhismeyaasha midkood inuu qayb ka yahay ururrada uu ka kooban yahay Dhaqdhaqaaqa Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Tanna waxaa loo yaqaan adeegsiga tilmaameed ee astaamaha.

**ASTAAMAHA:**

Waxaa maanta jira saddex astaamood oo la adeegsado:

Laanqayrt Cas

Bisha Cas

Cristal-ka Cas

# SIDEE ASTAAMAHA LOO ADEEGSAN KARAA?

Si adag ayaa adeegsiga astaamaha loogu habeeyey Heshiisyadii Jineefa ee 1949 iyo Sharci-kkabayaashooda Dheeriga aha ee 1977 iyo 2005. Laba qaab ayaa loo adeegsan karaa:

## UJEEDDOOYIN ILAALINEED DARTOOD

Xilliga colaadda hubaysan lagu jiro, waxaa astaamaha loo adeegsan karaa ujeeddooyin ilaalineed si loo hubiyo badqabka:

- Adeegyada caafimaadka iyo wadaaddada diimaha ee ciidamnmada qalabka sida la jira;
- Shaqaalaha caafimaadka, xarumaha iyo baabuurta Jamciyad Qarameeyada marka ay qabanayaan hawlaha adeegyada

caafimaadka ee ciidammada qalabka sida, iyaga oo hoos-imaanaya xeerarka iyo xeer-hoosaadyada milatariga;
- Iyaga oo fasax cad xukuumadda ka haysta, isla markaasna iyada ka amar-qaadanaaya, waxaa kaloo astaamaha adeegsan kara isbitaallada rayidka ah, dhammaan kooxaha caafimaadka, jamciyadaha kaalmada ee mutadawiciinta ah, qalabka iyo dhismeyaasha caafimaadka, shaqaalahooda, shaqaalaha caafimaadka ee rayidka ah iyo, sidoo kale, baabuurta loo qoondeeyey daaweynta iyo qaadista dhaawaca, bukaanka iyo kuwa ay maraakiibtu la qalibanto.

Sadexda astaamoodba maqaam siman ayay leeyihiin, sidii qalab-ilaalineed ayaana mid mid loo adeegsan karaa. Waa in ay ka muuqdaan goob cad iyaga oo aan la raacin hadal, sawirro dheeraad ah, naqshado ama qoraal raaga.

Xilliga nabadda, astaamaha si mid mid iyaga oo barax la' waxaa calaamad ilaalineed ahaan u adeegsan kara:

- Adeegyada caafimaadka iyo

Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) iyo Iskudhafka Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas (Iskudhafka Caalamiga ah), labadaasi iyagu goor walba way adeegsan karaan astaamaha (xilli nabadeed iyo mid colaadeedba).



Abdikarim mohamed/ICRC

wadaaddada diimaha ee ciidammada qalabka sida la jira;

- Shaqaalaha Ururrada dalka, goobaha caafimaadka iyo gaadiidka la hawlgalin karo xilliga colaadda iyadoo oggolaansho masuuliyiinta laga haysto.

## UJEEDDOOYIN TILMAAMEED DARTOOD

Xilliga nabadda, astaamaha waxaa loo adeegsan karaa ujeeddooyin tilmaameed dartood, sidaasna waxaa u adeegsan kara:

- mutadawiciinta, shaqaalaha ama hantida sida dhow Dhaqdhqaaqa xiriirka ula leh (oo loola jeedo Jamciyad Qarameedyada, ICRCd-a ama Iskudhafka Caalamiga ah);
- waxaa iyaguna, si aan joogto ahayn, u adeegsan kara aambalaasyada iyo rugaha gargaarka degdegga ah ee loogu talagalay bixinta caawimaad bilaash ah ee dhaawaca iyo bukaanka, sida waafaqsan shuruucda maxalliga ah iyo oggolaansho rasmi ah oo ay ka haystaan Jamciyad Qarameedka;

Ururrada Dhaqdhaqaaqu marka, iyada oo qayb ka ah calaamadaha lagu garto, ay astaanta ujeeddo tilmaameed u adeegsanayaan, waa in mar walba ay ku daraan magacooda ama la soo gaabiyey, sidaas awgeed uma fasaxna in "Laanqayrta Cas" ama "Bisha Cas" oo keliya ay adeegsadaan. Waxaa kaloo qasab ah in astaanta lagu muujiyo xaddi aan weyneyn, lamana oggola in lagu xirto cududda ama in laga soo laalaadiyo saqafka guryaha, si aan loogu qaldin astaamaha kale ee loo isticmaalo ujeeddooyinka ilaalineed dartood.



Ismail Taxta/ICRC

# SI-XUN-U-ADEEGSIGA ASTAAMAHA

Astaamaha oo si xun loo isticmaalo waxay yaraynaysaa qiimahooda ilaalineed, waxayna meesha ka saaraysaa ixtiraamka xilliga colaadda loo hayo. Waxayna halis gelineysaa kooxaha xaqa u leh in ay isku ilaaliyaan markay daryeel caafimaad bixinayaan, iyada oo wiiqaysa in shaqaalaha Dhaqdhaqaaqa ee hawlaha bini’aadamnimada iyo gargaarku ay howshooda si ammaan leh u qabsadaan. Haddaba, hababka hoose astaamaha looma adeegsan karo:

## ISU-EKEYSIIN

Waxaa reebban in la isticmaalo calaamad, qaabka iyo midabka ay leedahay dartood, astaamaha middood lagu qaldi karo.




## ADEEGSI AAN HABBOONEYN

Adeegsiga astaanta oo aan waafaqsaneyn xeerka caalamiga ah ee bin’aadamnimada lama ogola. Sidoo kale, waxaa mamnuuc ah in astaanta ay adeegsadaan dad ama hey’ado aan fasax u haysan ( shirkadaha ganacsiga, kuwa daawada farsameeya, dhakhaatiirta iskood u shaqaysta, ururrada aan Dawliga ahayn, shakhsiyaadka, iwm.) sidoo kale astaamaha looma adeegsan karo ujeeddooyin ay  dhici karto  in ay wiiqaan sharafta ama ixtiraamka astaanta darteed.

.




## DHAGAR

Adeegsiga astaanta xilliga colaadda hubeysan si loo ilaaliyo dagaalyannada iyo qalabka militariga, iyada oo ay ujeedadu tahay khiyaaneynta cadowga. Adeegsiga khiyaanada ah ee astaanta waxaa loo arkaa danbi dagaal haddii uu sababo dhimasho ama dhibaato kale.




Si loo hubiyo in caalami ahaan loo ixtiraamo lana ilaaliyo astaamaha, dal kasta oo qeyb ka ah Axdiyada Jineefa ee 1949 waxaa waajib ku ah meel marinta xeer maxalli ah oo lagu habeynayo adeegsiga astaamaha ciqaabna lagu mudan karo, loogana hortagayo si xun u adeegsigooda.

Sidoo kale madaxda maxalliga ah waa in ay qaadaan tallaabooyin ay ku ogeysiinayaan shacabka, ganacsatata iyo bahda caafimaadka adeegsiga habboon ee astaamaha.

Sidoo kale, Jamciyad Qarameedyadu waxay madaxda kala shaqeeyaan sidii loo hubin lahaa adeegsiga hagaagsan ee astaamahan.

# CALAAMADAHA WAXQABADKA BINI'AADAMNIMO EE DHAQDHAQAAQA CAALAMIGA AH EE LAANQAYRTA CAS IYO BISHA CAS

Bandhigga shaqaalaha iyo mutadawiciinta Jamciyad Qaramameedyada ee calaamadaha laanqayrta cas iyo bisha cas, si ay u muujiyaan xiriirkooda Dhaqdhaqaaqa, xilliyada colaadda hubeysan, musiibooyinka dabiiciga ah iyo xaaladaha kale ee deg-degga ah, waxay dirayaan farriiin muhiim ah: shaqada ay hayaan in ay tahay mid bini'aadamnimo oo barax la' mar walbana la ixtiraamo gaaritaankooda ammaanka ah ee dadka iyo bulshada ay dhibtu gaartay.

Kuwa Dhaqdhaqaaqa ka tirsan ee astaamahooda muujiya waxaa ka goa'an in ay howlahooda bini'aadamnimo u fuliyaan si waafaqsan Todobada Mabda' ee Aasaasiga ah ee Dhaqdhaqaaqa: bini'aadamnimo, eex la'aan, dhexdhexaadnimo, madaxbanaani, adeeg mutadawacnimo, midnimo iyo caalaminimo. Dadku waxay fahmayaan in aysan shaqadoodu la xiriirin ajende siyaasadeed, diin, ciidan ama dhaqaale, ayna tahay in la aqbalo, lagu kalsoonaado lana ixtiraamo.

Fahamkani waa muhiim maxaa yeelay wuxuu ka tarjumayaa dadku nuuc kasta oo ay yihiin, iyo dhan kasta oo ay colaadda kaga jiraanba, waxay ku kalsoon yihiin ujeedooyinka shaqaalaha. Tan ayaa shaqaalaha Laanqayrta Cas, Bisha Cas iyo mutadawiciintaba ka caawineysa in ay si ammaan ah ku gaaraan dhammaan dadka iyo bulshooyinka caawinta u baahan xitaa xilliyada dagaalka iyo dhibaatooyinka kale ee bini'aadamnimo.




Abdikarim mohamed/ICRC

# ASTAAMO RAAGEY

Henry Dunant oo ahaa ganacsade Iswiis ah ayaa 1859-kii isaga oo sodcaal ku maraya waqooyiga Talyaaniga wuxuu indhihiisa ku soo arkay natiijooyinkii foosha xumaa ee ka dhashay goobtii dagaal ee ka dhacday gudaha iyo agagaarka magaalada Solferiino. Wuxuu aad iyo aad uga murugooday kumanyaalkii goobtaas ku dhaawacmay iyo askartii dhimaneysey ee iyaga oo daryeel caafimaad aan helin la isaga dhaqaaqay, dabadeedna wuxuu qoray oo faafiyey buug uu ku magacaabay Xusuustii Solferiino; kaas oo uu ku soo bandhigay laba talo oo dhibbaneyaasha dagaalka lagu kaalmayn karo:

- In waqtiga nabadda, dal kasta laga abuuro jamciyado gargaar oo ka kooban mutadawiciin diyaar u ah inay daryeelaan askarta xilliga dagaalka dhaawacanta, iyo
- In dalalku ku heshiiyaan fikradda ah in la ilaaliyo dhaawaca iyo bukaanka goobta dagaalka iyo, sidoo kale, kuwa daryeelaaya.

Talada koowaadi waxay horseeday in dal kasta oo dunida ku yaal laga dhiso Jamciyad Qarameed ee Laanqayrta Casa amaba Bisha Cas ah.

Talada labaadna waxaa ka dhashay qaadashada Axdiyada Jineefa. Maanta Dawladaha oo idil ayaa aqoonsan Afarta Axdi ee Jineefa ee 1849, isla markaasna ku qasban in ay ku dhaqmaan. Waxay kaloo taladaasi horseeday in la isla qaato calaamad calaamadaha kale oo dhan ka duwan, taas oo gacan ka geysan karta ilaalinta shaqaalaha caafimaadka milatariga, mutadawiciinta gargaarka iyo dadka dhaawacma inta xilliga colaadda lagu jiro. Calaamaddaas - amaba astaantaas sida waayadii dambe loo bartay – waxay noqotay mid sahlan, meel fog laga aqoonsan karo, qof waliba uu garanaayo, mar walbana isku mid ah.

Shir diblomaasiyeed 1864-kii magaalada Jineefa lagu qabtay ayaa lagu qaatay Laanqayrta Cas gadaasheeduna ay caddaan tahay, iyada oo midabbaduna yihiin isla kuwa calanka Iswiiska oo meeshii gadaal ahayd la horraysiiyey. Ka dib, 1876 ilaa 1878-kii, dagaalkii Ruushka iyo Turkigu intii uu socdey ayaa Boqortooyadii Cusmaaniyiintu waxay ku dhawaaqday in Laanqayrta Cas baddalkeeda ay, maalintaas ka dib, Bisha Cas adeegsan doonto; taas oo noqotay calaamad si rasmi ah loo aqoonsaday sannadkii 1929-kii, markaas oo isbaddel lagu sameeyey Axdiyadii Jineefa ee Koowaad.

Sannadkii 2005-tii ayaa, haddana, Dawladihii Heshiisyada Jineefa qaybta ka ahaa waxay oggolaadeen astaan kale oo ah midda kiristaalka cas. Kiristaalka casi waxay leedahay meekhaan sharciyeed oo la mid ah midka ay leeyihiin Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, waxaana loo isticmaali karaa isla sida labadaas loo isticmaalo iyo isla shuruurada u dhigan. Waxaa adeegsan kara Dowladaha iyo Jamciyad Qarameedyada aan dooneyn Laanqayrta Cas amaba Bisha Cas in ay adeegsadaan.

wSi aad u hesho warar dheeraad ah oo arrintaan ku saabsan booqo: www.icrc.org/eng/war-and-law/emblem/overview-emblem.htm

ICRC-du waxay caawisaa dadka Adduunka oo dhan oo ay saameeyeen colaadaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee rabshadaha wata, iyada oo sameyneysa wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda dhibtana uga yareyso, iyada oo inta badan la shaqeyneysa saaxiibadeeda Laanqeyrta Cas iyo Bisha Cas. ICRC waxa kale oo ay ku dadaaleysaa in ay ka hortagto dhibaatada iyada oo dhiirri galineysa oo xoojineysa sharciga ccalamiga ah ee bini'aadamnimada, sidoo kalena hormuud u noqoneysa mabaadii'da caalamiga ah ee bini'aadamnimada.


**Xafiiska ICRC Muqdisho**
Degmada Wadajir
Xaafadda Buulo-xuubey
Muqdisho
mog_mogadiscio@icrc.org

**Xafiiska ICRC Hargeisa**
Degmada Jig Jiga Yar
Ka soo horjeedka suuqa Cosob
Hargeysa
hag_hargeisa@icrc.org

**Xafiiska ICRC Kismaayo**
Fanoole isgoyska Qacle
ka soo horjeedka
Dhismaha Sadaam 2
Kismayo
kis_kismayo@icrc.org

**Xafiiska ICRC Garoowe**
Halgan Qeybta A
Lambar guri 0185
Wadada Jimcaale
Garowe
gar_garowe@icrc.org

**Xafiiska ICRC Baydhabo**
Dhabarka dambe siinka Somaphone
Wadada Muqdisho-Baydhabo
Baydhabo
bad_baidoa@icrc.org

**Xafiiska ICRC Jowhar**
Wadada airport-ka
Hantiwadaag
Laanta 2 ee Baryare
jow_jowhar@icrc.org

**Xafiiska ICRC Dhusamareeb**
Wadada Kadiye, Xaafadda Hodan
Dhabarka hoteelka BCQ
Dhusamareeb
dhu_dhusamareb@icrc.org

**Xafiiska ICRC Nayroobi**
Wadada Ngecha
Kabete Hoose
S.B 73226-00200
Nayroobi, Kenya
SOK-Nairobi@icrc.org


ICRC

www.icrc.org
© ICRC, Oktoobar 2017

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
instagram.com/icrc_somalia
blogs.icrc.org/somalia

Garbedka hore: D. Aloisi/ICRC, M. al-Khuzai/IFRC

0876/002 10.2025 2000